

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

REF. ....JSL/M/DECM/249-3196/052010

DATE ..... 17/05/10

DEGREETO MADAXWEYNE NO: 435/052010

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Xareef  
23.5.2010  
Rell

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

Markuu Arkay: Go'aanka GW, Go'aan Lr. GW/KF-11/5/181/2010 ee ku suntan 10/05/2010 iyo Go'aan GG, Go'aan Lr. GG/JSL/79/05/2010 ee 16/05/2010 kaasi oo ay ku ansixiyeen Mashruuca Wax-ka-beddelka Xeerka Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka & Madaxtooyadda Xeer Lr. 20/2001.

Wuxuu Soo Saaray

Mashruucan oo lagu baahinayo dhaqan-galka wax-ka-beddelka iyo kaabidda lifaaqa Xeerka Doorashooyinka (Xeer Lr: 20/2001).

Allaa Mahad Leh

  
Daahir Rayaale Kaahin  
Madaxweynaha JSL





Ref: CW/KP-11/481/2010

Date: 10/05/2010

Ujeedo: - Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabidda  
Xeerka Doorashooyinka lifaaqa labaad (Xeer Lr:20/2001)

### GOLAHA WAKIILADA JSL

**MARKUU ARKAY:** Qodobada 9 aad , 22 aad, 83 aad iyo 111 aad ee Dastuurka JSL.

**MARKUU ARKAY:** Go'aanka Ansixinta Guurtida GG/JSL/79/05/2010 ee 16/03/2010 kuna ansixiyeen cod aqlabiyad ah 45 mudane gacantaag ah 1 mudanena ka aamusay iyaga oo ku ansixiyay siduu kaga yimi Golaha Wakiilada

**MARKUU TIXGELIYEEY:** Baahida Loo qabo in la waafajiyo nidaamka cusub ee Qaybinta kaadhadhka cusub ee xeerka doorashooyinka(Xeer Lr:20/2001).

**MARKUU KU QANCAAY:** In lagama maarmaan ay tahay in la helo wax-ka bedel lifaaq labaad u noqon doona (Xeer Lr:20/2001)

**MARKUU GARAWSADAY:** Baahida loo qabo in aan dib u dhac ku iman doorashada madaxtooyada ee inagu soo fool leh.

**MARKUU U CODEEYEEY:** Wax-ka badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Lifaaqalabaad kal-fadhigii 11<sup>aad</sup> ee Fadhigiisii 41<sup>aad</sup> ee Golaha 10/05/2010 oo ay goobjoog ahaayeen 53 Xubnood oo ka mid ah Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

### WUXUU

Cod aqlabiyad ah **(43) cod** oo gacan tag ah ku ansixiyey wax-ka-bedelka iyo kaabidda Xeerka Doorashooyinka lifaaqa labaad **(Xeer Lr:20/2001)**, halka ay ka aamuseen **(9) mudane, cid diidayna** aanay jirin, **Guddoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

  
C/risaaq Siciid Ayaanle  
K/S Xog. Guud ee Golaha Wakiilada

  
C/raxmaan Maxamed C/laahi(Ciro)  
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



**WAX-KA-BEDDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH  
XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA  
DEEGAANKA (XEER Lr. 20/2001)  
LIFAAQA 2AAD**

*Wax-ka-beddelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa ay saamayn ku yeelanaysaa Qodobbada 5, 7, 12, 16, 17, 19, 20, 23, 25, 26, 32, 37, 42, 45, 47, iyo 65 ee Xeer Lr. 20/2001 iyo Lifaaqa 1aad.*

**Qodobka 5aad**

**Shuruudaha Cod-bixiyaha**

Qodobka 5aad ee Xeerka oo ku saabsan Shuruudaha Cod-bixiyaha waxaa lagu kordhiyay faqrad 5aad oo cusub oo u qormaysa sidan:

- 5) *Murashaxiinta u tartamaaya jagooyinka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisu waxa ay ka codayn karaan goob kasta oo cod-bixineed. Haseyeeshee hawl-wadeennada Doorashadu waa in ay arrintaas diiwaan-geliyaan.***

**Qodobka 7aad**

**Shaqaalaha Dawladda iyo Hay'adaha Dawliga ah**

Qodobka 7aad, faqraddiisa 1aad oo waajibinaysa in Muddada uu Shaqada ka tagaayo qofka Shaqaalaha Dawladda ah ee isu sharraxaaya Doorashooyinka Deegaanka iyo Madaxtooyadu ay tahay 180 cisho ka hor taariikhda qabashada Doorashada waxaa loo beddelay:

***“Lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada”***

**Qodobka 12aad**

**Shuruudaha Xubinta Komishanka**

Qodobka 12aad, faqradda 2aad oo sheegaysa da'da xubinta Komishanka loo xulaayo waxaa loo beddelay:

***“Waa in aan da'diisu/da'deedu ka yaraan 40 jir kana waynaan 70 jir”***



### **Qodobka 16aad**

#### **Xafiiska Goobta Cod-bixinta**

Qodobka 16aad, faqradda 1aad oo xaddidaaya tirada hawl-wadeennada Xafiiska Goobta Cod-bixinta oo ka kooban Afar (4) xubnood waxaa lagu kordhiyay xubin shanaad oo noqonaysa:

***“Mas’uulka uruurinaaya cabashooyinka islamarkaana tilmaamaaya cod-bixiyeyaasha (help desk officer)”***

### **Qodobka 17aad**

#### **Xafiiska Degmada ee Doorashada**

Qodobka 17aad, faqraddiisa 1aad oo qeexaysa Qaab-dhismeedka Xafiiska Degmada waxaa loo beddelay sidan:

***“Xarunta Degmo kasta waxaa ka jiraaya Xafiis Doorasho Degmo. Waxaanu ka koobmayaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo hubiye”.***

Faqradda 3aad ee Qodobka 17aad waxaa loo akhriyayaa:

***“Guddoomiyaha, Guddoomiye Ku-xigeenka, Hubiyaha, Xog-haynta iyo tiriyeyaasha waxaa magacaabaaya Komishanka, isagaana awood u leh isku-beddelkooda”***

### **Qodobka 19aad**

#### **Hawl-wadeennada Xafiisyada Doorashada**

8) Qodobka 19aad, faqraddiisa 1aad waxaa loo beddelay:

***“Xubnaha Komishanku u magacaabo xafiisyada Doorashada waa in loo sheego in xilka loo magacaabay ugu yaraan 60 (lixdan) maalmood ka hor taariikhda la qabanaayo doorashada”***

9) Shuruudaha lagu soo xulanaayo Guddoomiyeyaasha Xafiisyada Doorashada Degmada iyo Gobolku waxa ay la mid yihiin kuwa lagusoo xulanaayo Komishanka Heer Qaran marka laga reebo da’da oo ah:

***“In aanu/aanay da’diisu/da’deedu ka yarayn 36 jir kana waynayn 70 jir”***

## Qodobka 20aad

### Gunnada Hawl-wadeennada

Qodobka 20aad, faqraddiisa 2aad oo dhigaysa:

***“Gunnada kala-badh ayaa la siinayaa haddii hawl-wadeenku yahay shaqaale dawladeed ama Hay’ad dawladeed (public bodies)”***

Waa la tirtiray, maadaama shaqaalaha dawladdu ayna ka mid noqon karin hawl-wadeenada Xafiisyada Doorashooyinka ee Komishanka.

## Qodobka 23aad

### Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxiinta

Qodobka 23aad oo ka hadlaaya Qaabka Soo Bandhigidda Murashaxiinta waxaa lagu kordhiyay saddex faqradood oo kala ah 5, 6 & 7:

- 5) Murashaxa isusoo sharraxay Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisu waxa uu xaq u leeyahay in uu ka tanaasulo. Haseyeeshee waa in uu qoraal rasmi ah usoo gudbiyo Xisbigii uu ka sharraxnaa iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka ugu yaraan 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Xisbigii uu murashaxaasi ka sharraxnaa waxa uu soo beddeli karaa oo keliya **7** maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta.
- 6) Haddii mid ka mid ah murashaxiinta Madaxweynaha ama Ku-xigeenkiisa ee Xisbiyada Siyaasaddu uu geeriyoodo ka dib marka la soo gudbiyo liiska murashaxiinta, waxa uu Xisbiga ay khusaysaa xaq u leeyahay in uu soo beddesho **7 (toddoba)** maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta. Haddii uu murashaxu geeriyoodo **7da** maalmood ee ugu dambeeya gudahooda, Xisbigaasi xaq uma laha in uu soo beddesho. Xaaladaha ku saabsan bannaanaanshaha Jagada Madaxweynaha ama Ku-xigeenka ee ku xusan Qodobbada 86aad iyo 89aad ee Dastuurka, waxaa loo tixraacayaa Dastuurka.
- 7) **Haddii muddada lagu cayimay faqradaha 5aad iyo 6aad ee toddobada maalmood ah ay Xisbiyadu kusoo beddeli waayaan Murashaxii ay jagadiisu bannaanaatay sababaha ku xusan faqradahaas awgood, magaca murashaxa jagadiisu bannaanaatay ayaa lagu tartamayaa.**

### **Qodobka 25aad**

#### **Deebaaji**

Qodobka 25aad ee sheegaaya in murashaxiinta u tartamaaya xilalku ay bixiyaan deebaaji aan celin lahayn waa la beddelay waxaana lagu beddelay sidan:

- a) Sl. Sh. 5,000,000 (Shan Milyan oo Shilin) murashixiinta Madaxtooyada midkiiba;
- b) Sl. Sh. 1,000,000 (Hal Milyan oo Shilin) murashixiinta Deegaanka midkiiba.

### **Qodobka 28aad**

#### **Ololaha Doorashada**

Qodobka 28aad ee Xeerka oo ku saabsan Ololaha Doorashada waxbaa laga beddelay waxaana lagu kordhiyay faqradda 3aad oo u qormaysa sidan:

- 3) Ololaha Madaxtooyada ee xilligani (Doorashada Madaxtooyada ee sannadka 2010) waxa uu noqonayaa muddo saddex todobaad ah (21 maalmood). Waxa uu Ololuhu bilaabmayaa 23 maalmood ka hor maalinta doorashadu ay dhacayso, waxaanu dhammaanayaa 48 saac ka hor maalinta codbixinta. Hase yeeshee, haddii Ololaha Doorashadu uu ku beegmo bisha Ramadaan waxaa la adeegsanayaa Qodobka 28aad, faqradda 2aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Lifaafa u ah Xeer Lr. 20/2001 ee Golaha Wakiilladu ansixiyay 26/07/2009.

### **Qodobka 32aad**

#### **Wakiillada Axaabta**

Qodobka 32aad, faqraddiisa 3aad oo dhigaysa in magacyada wakiillada Xisbiyada la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 10 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta waxaa loo beddelay:

***“Magacyada wakiillada Xisbiyada waa in la geeyo Komishanka ama Xafiisyadiisa 20 maalmood ka hor taariikhda cod-bixinta”***



### Qodobka 37aad

#### Qalabka Xafiiska Doorashada

Qodobka 37aad, faqraddiisa (n) ee Waxka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka oo dhigaysa in Qalabka Xafiiska Doorashada ee Goobta la dhigo:

***“Aalad gaar ah oo lagu dalooliyo kaadhka cod-bixiyeyaasha (special instrument for punching voter’s cards)” waa la tirtiray.***

### Qodobka 42aad

#### Xafiiska Goobta Codbixinta

Qodobka 42 (1) (a) waxaa lagu kordhiyay in:

***“Mas’uulka ururinaaya cabashooyinku uu ka mid noqdo shaqaalaha Xafiiska Goobta cod-bixinta”***

Waxaa Qodobka lagu kordhiyay oo kale faqrad 5aad oo u qormaysa sidan:

- 5) Haddii ay Xisbiyada Siyaasaddu goob cod-bixineed usoo diran waayaan wakiillo, hawsha doorashadu u xannibmi mayso, hawl-wadeennada Komishanka ee goobtuna shaqadooda way wadanayaan.

### Qodobka 45aad

#### Tallaabooyinka Ka Horreeya Cod-bixinta

Qodobka 45aad, faqraddiisa 1aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 waxa uu u qormayaa sidan:

Cod-bixiyuhu wuxuu codkiisa dhiiban karaa ka dib marka:

- 1) ***Uu Kaadhkiisa cod-bixinta u dhiibo Guddoomiye-Ku-Xigeenka goobta codbixinta (ahna labada hubiye kooda ugu da’da weyn), si uu u hubiyo in uu yahay kaadh cod-bixineed oo sax (valid) ah, isagoo ka hubinaaya tilmaamaha kaadhka cod-bixiyaha liiska cod-bixiyeyaasha ansaxa ah. Islamarkaana hubiyo in far-yaradiisa bidix, haddii aanu lahaynna faryaradiisa midig, haddii aanu taana lahaynna meelaha muuqda ee jidhkiisa in aanu kaga oollin khadka aan masaxmini, dabadeedna uu kaadhka ugu gudbiyo Xog-hayaha***

goobta, iyadoo ay kaadhka isha sii marinayaan wakiillada Xisbiyadu, haddii ay goobta ku sugan yihiin.

- 2) Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyayaashoodu ka bataan 750 codbixiye waxa loo kala jabinayaa (qaybinayaa) laba sanduuq oo ah A & B.

#### Qodobka 47aad

##### Nidaamka Cod-bixinta

Qodobka 47aad, faqradda 7aad ee Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 oo xusaaya in kaadhka cod-bixinta la dalooliyo waa la tirtiray (**repealed**). Sidoo kale, waxaa la tir-tiray faqradda 9aad, laynka labaad oo u qoran: **“Kadib markuu hubiyaha labaad dalooliyo”**

#### Qodobka 65aad

##### Dacwadaha Doorashada

Qodobka 65aad, faqraddiisa 1aad ee Xeer Lr. 20/2001 oo qoraysa Soo Gudbinta Dacwadaha ku saabsan Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa waxaa loo beddelay sidan:


- 1) **Dacwadaha ku saabsan Doorashada Madaxweynaha iyo Ku-xigeenka Madaxweynaha waxaa awood u leh Maxkamadda Sare, waana in dacwaddaasi ay soo gaadho Kaalinta Maxkamadda Sare 10 (toban) maalmood gudahood oo ka bilaabanta maalinta ay Komishanka Doorashooyinka Qaranku ku dhawaaqaan natiijada Ku-meel gaadhka ah. Maxkamadda Sare, waa in ay ka hor intaanay muddada Dastuuriga ahi dhammaanin ay go'aan kaga gaadho dacwaddaas. Haddii ay wakhtiga loo cayimay dhaafto dacwaddaasi wax tixgelin ah ma leh.**

#### Qodobka 66aad

##### Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001

- 3) Wax-Ka-Beddelka iyo Kaabista Xeer Lr. 20/2001 waxa uu dhaqan-gelayaa marka ay Goleyaasha Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxweynuhu saxeexo.

C/risaaq Siciid Ayaanle  
K/S Xoghaha Guud ee G/Wakiilladda



C/raxmaan Maxamed C/laahi  
Guddoomiyaha G/Wakiilladda

